




Isqorista & Barnaamij Isudheellitirka Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari Xirmada Talo soo-jeedinta - 12/17/2020

Talo Soo-jeedinada Wajiga 1 Guudmarka iyo Mabaadi'da Hagaya

Iyadoo lagu saleynayo jawaab-celinta bulshada iyo hagidda Guddiga, isbaheysiga ayaa ku soo koobay howlihiisa Wajiga 1 u qoondeynta iskuulo iyo barnaamijyo Kellogg Middle School marka uu furmo Dayrta 2021. Waxaan ka shaqeynay qorshe gaari kara dhowr ahmiyado:

- U beddelashada dugsiyo badan oo K-8 ah intii suurtagal ah dugsiyada K-5 ee Dayrta 2021, iyadoo la raacayo aragtida degmada ee ku aaddan dugsiyada dhexe oo dhamaystiran
- Ku xaddidida isqorista la saadaaliyay ee bilowga ah ee Kellogg illaa 640 arday (oo ah 80% heerka adeegsiga dhismaha), si loogu meeleeyo bilow fiican oo boos loogu baneeyo korarka isqorista ee dugsiyo badan oo cusub la kulmaan
- Hubinta barnaamijyada buuxa ee dugsiyada dhexe, iyadoo xoogga la saarayo diiradda Sinaanta Isirka iyo Caddaaladda Bulshada degmada (RESJ) iyo mudnaan siinta dugsiyada K-8 ee u adeega bulshada taariikh ahaan la takooro
- Wax ka qabashada yaraanta boos ee isla markiiba ka jirta Bridger iyadoo loo oggolaanayo xannaanada in ay ku soo laabtaan dugsiyada (qaabka ay hadda u dhisan tahay, dugsiyada waxaa ka maqan hal fasal dayrta 2021 xitaa iyadoo xannaanada aynan joogin).
- Joogtaynta dabacsanaanta si loo tixgeliyo noocyada kala duwan ee kala-doorashada Wajiga 2 ee ka diiwaangelin karo arday ku filan Harrison Park (dayrta 2022), yareynta ciriiriga badan ee Franklin High School, iyo buuxinta yoolalka kale ee isbahaysiga

Dhammaan xulashooyinka aan tixgelnay waxay ku lug lahaayeen isweydaarsi adag, maxaa yeelay wadarta isqorista ee dugsiyada uu qaato Kellogg aad bay uga badantahay 640 arday - dhammaan dugsiyadaan lama qaadan karo Talo soo-jeedinta hoose waxay kasbatay taageerada ugu badan iyada oo loo marayo nidaam is-afgarad ee isbahaysiga sababta ma aha inay fiican tahay, balse waa inay buuxiso ahmiyada ugu badan oo ay leedahay caqabado ay PPS ku xallin karto dabagalyo beegsi ah toddobaadyada soo socda.





Isqorista & Barnaamij Isudheellitirka Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari Xirmada Talo soo-jeedinta - 12/17/2020

Talo soo-jeedintayada waxay xoojineysaa dhamaan iskuulada dhexe ee Isbaanishka DLI ee kuyaala Koonfur-bari Kellogg, oo ah meesha bartamaha ugu ah uguna badan dadka ku hadla Isbaanishka Tani waxay u saamaxaysaa Kellogg in ay si dhakhso leh u qaato Lent— mudnaanta koowaad marka la eego tirada ardayda Madow iyo Latinx ee halkaa ka diiwaangashan ee aan marin u helin dugsi dhexe oo dhammaystiran. Marysville waa mudnaanta waana in Kellogg uu qaataa isla markiiba isal sababaha oo kale. Intaa waxaa dheer, Bridger wuxuu isla markiiba u beddelmayaa K-5, taasoo xallinaysa arrintiisa booska (in kasta oo ay su'aal ka imanayso halka ay ardayda dugsiga dhexe ee xaafadiisa dhiganayaan sannadka dambe, hoos ayaa looga hadlay).

Taasi waxay u baneyneysaa boos hal dugsi dheeraad ah oo xaafadda ah oo inuu Kellogg qaato ahayd si ardayda loogu hayo 640 ka yar. Waxaan ku talineynaa xulashada adag ee quudinta Arleta isla markaaba iyo dib u dhigista u beddelidda Creston K-5 muddo hal sano ah maxaa yeelay (1) Creston waxaa dhigta ardayda yar ee midabka ah iyo ardayda ka soo jeeda qoysaska dakhligoodu hooseeyo marka loo eego Arleta, Lent, iyo Marysville, taas oo ka dhigaysa dugsiyadaas a mudnaanta marka laga eego aragtida RESJ, iyo (2) waxay noo oggolaanaysaa inaan si taxaddar leh u tixgelinno sida tubta quudinta Creston ay saameyn ugu yeelato isqorista Franklin ee Wajiga 2, iyadoo loo eegayo inay u dhowdahay labadaba Franklin iyo Cleveland.

Haddii PPS iyo Guddigu horay ugu sii socdaan talo soo jeedintan, shaqaalaha degmadu waa inay u heellan yihiin inay la shaqeeyaan bulshada Bridger si loo aqoonsado goobta dayrta 2021 ee loogu talagalay barnaamijkeeda dugsiga dhexe ee xaafadda, iyo bulshada Creston si loo xoojiyo khibradaha ardayda dugsiga dhexe ee halkaas sannadka dambe.

Faahfaahin iyo Tirakoob kooban oo ku saabsan Wajiga 1 ee Talo Soo-jeedinta

Maxaa **is-beddeli doona** 2021-22:

- Barnaamijka xaafada **Arleta** waxaa laga badalayaa K-8 loona badalaa dugsiga hoose-dhexe K-5. Ardayda Fasalka 6-8 waxaa loo beddeli Kellogg Middle School laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2021-22. Barnaamijka K-5 wuxuu quudin (waxaa qaadan) Kellogg Middle School.
- Barnaamijka xaafada **Marysville** waxaa laga badalayaa K-8 loona badalaa dugsiga hoose-dhexe K-5. Ardayda Fasalka 6-8 waxaa loo beddeli Kellogg Middle School laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2021-22. Barnaamijka K-5 wuxuu quudin (waxaa qaadan) Kellogg Middle School.
- Barnaamijka xaafada **Lent** waxaa laga badalayaa K-8 loona badalaa dugsiga hoose-dhexe K-5. Ardayda Fasalka 6-8 waxaa loo beddeli Kellogg Middle School laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2021-22. Barnaamijka K-5 wuxuu quudin (waxaa qaadan) Kellogg Middle School.
- Barnaamijka Ku-barashada labada luuqad ee Isbaanishka **Lent** waxaa laga badalayaa K-8 loona badalaa dugsiga hoose-dhexe K-5. Ardayda Fasalka 6-8 waxaa loo beddeli Kellogg Middle School laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2021-22. Barnaamijka K-5 wuxuu quudin (waxaa qaadan) Kellogg Middle School.
- Barnaamijka Ku-barashada labada luuqad ee Isbaanishka **Bridger** waxaa laga badalayaa K-8 loona badalaa dugsiga hoose-dhexe K-5. Ardayda Fasalka 6-8 waxaa loo beddeli Kellogg Middle School laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2021-22. Barnaamijka K-5 wuxuu quudin (waxaa qaadan) Kellogg Middle School. (Saamaynta **barnaamijka xaafadda 6-8 ee Bridger** ayaa lagaga wada hadlayaa xagga hoose.)
- **Atkinson Elementary/Mt.** Barnaamijka ku-barashada Isbaanishka labada luuqad ee **Tabor** Middle School ayaa loo beddelayaa Kellogg Middle School sanad dugsiyeedka 2021-22.

Maxaa **is-beddeli doonin** 2021-22:

- **Creston** wuxuu ahaan doonaa dugsi K-8 gudaha 2021-22, iyadoo Dugsiga Dhexe/Sare ee quudin (uu qaadan) doono la xaqiijinaya gudaha Wajiga 2 ee shaqada SEGC. Waxaa loo beddelayaa dugsi K-5 ah Dayrta 2022.



Isqorista & Barnaamij Isudheellitirka Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari Xirmada Talo soo-jeedinta - 12/17/2020

- **Harrison Park** wuxuu sii ahaan doonaa dugsi K-8 ah 2021-22, waxaa loo beddeli doonaa dugsi dhexe Dayrta 2022 sidii horay loo qorsheeyay (iyada oo dugsiyadeeda quudinta lagu go'aaminayo Wajiga 2 ee shaqada isbahaysiga hagida).
- **Barnaamijka xaafada Atkinson** ayaa wali loo qoondeynayaa Mt. Tabor MS sanad dugsiyeedka 2021-22. Isbahaysiga hagida ayaa tixgelin doona tubta quudinta muddada-dheer ee Atkinson inta lagu jiro Wajiga 2 ee shaqadiisa.
- **Dhamaan goobaha iyo qaabeynta barnaamijka K-5 DLI** wali isma bedelin 2021-22. SEGC waxay tixgelin doonaan wixii isbeddel ah ee ku yimaada barnaamijyadan Wajiga 2 ee shaqadeeda
- **Dhammaan soohdinada ka-xaadirka** ee K-5 weli isma beddelin 2021-22. SEGC waxay tixgelin doonaan isbadalada soohdinada inta lagu jiro Wajiga 2 ee shaqadeeda.

Shaxda 1: Qiyaasaha isqorista iyo adeegsiga.

Dugsiga	Barnaamijyo	2019-20 Isqorista fasalada 6-8	2019-20 Adeegsiga Dhismaha	2024-25 Saadaasha Isqorista ee Fasalaka 6-8	2024-25 Saadaasha Adeegsiga Dhismaha
Arleta	Xaafadda	163	N/A	▲ 172	N/A
Bridger	Xaafadda	74	N/A	▼ 56	N/A
	Ku-barshada Isbaanishka	51		▲ 78	
Lent	Xaafadda	104	N/A	▼ 74	N/A
	Ku-barshada Isbaanishka	64		▲ 64	
Marysville	Xaafadda	118	N/A	▲ 120	N/A
Mt Tabor	Xaafadda Atkinson kaliya	106	N/A	▼ 99	N/A
	Ku-barshada Isbaanishka	69		▼ 66	
Soo-jeedinada Wajiga 1					
Kellogg	Xaafadda, Ku-barashada isbaanishka	569	70.9%	▲ 574	71.5%

Dugsiga/barnaamijka lagu daray Soo-Jeedinada Wajiga 1
Adeegsiga inta u dhexeysa 60-80% bartilmaameedka

Qiyaasta isqorista waxay ku saleysan tahay isqorista dhabta ah Oktoobar 1, 2019 oo ay ku jiraan dhammaan baddelaadaha. Saadaasha isqorista waxay ku saleysan tahay daraasadda Xarunta Cilmi-baarista Portland State University oo la daabacay 2020.



Isqorista & Barnaamij Isudheellitirka
Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari
Xirmada Talo soo-jeedinta - 12/17/2020

Shaxda 2: Tilmaamayaasha dhaqan-dhaqaale ee qiyaasaha isqorista.

Dugsiga	Barnaamijyo	Isirka & Jinsiyada								Cunnooyinka Boqolkiiba Bilaash ah	Waxbarashada Boqolkiiba Khaaska ah	Boqolkiiba Bartayaasha Luqadda Ingiriiska
		Aasiyaan	Aasiyaan-Cadaan	Madaw	Laatiino	Dhalad Maraykan	Jinsiyo-do-Badne	Dadka Jasiiradaha Baasifigga	Cadaan			
Arleta	Xaafadda	9.2%	3.7%	1.8%	22.1%	0.6%	8.0%	0.6%	54.0%	28.8%	19.6%	6.1%
Bridger	Xaafadda	16.2%	2.7%	12.2%	17.6%	1.4%	6.8%	2.7%	40.5%	50.0%	12.2%	14.8%
	Ku-barshada Isbaanishka	2.0%	3.9%	2.0%	70.6%	0.0%	2.0%	0.0%	19.6%	7.8%	13.7%	15.7%
Lent	Xaafadda	20.2%	1.9%	10.6%	36.5%	2.9%	8.7%	2.9%	16.3%	42.3%	24.0%	10.6%
	Ku-barshada Isbaanishka	1.6%	0.0%	3.1%	85.9%	0.0%	0.0%	0.0%	9.4%	31.3%	7.8%	17.2%
Marysville	Xaafadda	28.8%	4.2%	12.7%	14.4%	1.7%	10.2%	4.2%	23.7%	37.3%	17.8%	6.8%
Mt Tabor	Xaafadda Atkinson kaliya	14.2%	6.6%	1.9%	2.8%	0.0%	1.9%	0.0%	72.6%	3.8%	15.1%	3.8%
	Ku-barshada Isbaanishka	1.4%	0.0%	1.4%	58.0%	0.0%	2.9%	0.0%	36.2%	20.3%	8.7%	17.4%
Soo-jeedinada Wajiga 1												
Kellogg	Xaafadda, Ku-barashada isbaanishka	12.8%	2.6%	5.8%	39.0%	1.1%	6.5%	1.6%	30.6%	30.4%	16.9%	10.5%

Dugsiga/barnaamijka lagu daray Soo-jeedinada Wajiga 1

Qiyaasta isqorista waxay ku saleysan tahay isqorista dhabta ah Oktoobar 1, 2019 oo ay ku jiraan dhammaan baddelaada-

Caqabadaha iyo Xalalka Suuragalka ah

In kasta oo talooyinka kor ku xusan ay kasbadeen taageero aad uga badan xulashooyinka kale ee la tixgeliyey, xubnaha isbahaysiga waxay caddeeyeen caqabado dhowr ah oo in PPS wax ka qabato ah inta lagu guda jiro hirgelinta:

- **Goobta dugsiga dhexe ee xaafadda Bridger:** U beddelida barnaamijka Isbaanishka 6-8 DLI ee Bridger xaga Kellogg ee Dayrta 2021 waxay u baahan tahay guurid kumeelgaar ah ee barnaamijka xaafadda — isdiiwaangelinta xaafadda oo keliya ayaa aad u yar si ay keligeed u jirta. Xubnaha isbahaysiga waxay soo jeediyeen Harrison Park K-8 iyo Kellogg inay yihiin fursado. Haddii taladani ay horay u socoto, PPS waa inay la xiriirtaa qoysaska dugsiga dhexe ee Bridger si ay xal loo helo, iyadoo la fahamsan yahay in dariiqa muddada-dheer ee quudinta ee barnaamijka xaafadda Bridger aan la go'aansan doonin illaa Wajiga 2 ee shaqada isbahaysiga.
- **Dib-u-dhigista u-beddelidda K-5 ee Creston:** Xubnaha isbahaysiga waxay muujiyeen walaac ay ka qabaan Creston inuusan u beddelmayn dugsiga K-5 sanadka soo socda sida in badan oo ka mid ah bulshada dugsiga ay filayeen. Haddii taladani ay horay u socoto, PPS waa inay lashaqeyaan bulshada Creston si loo aqoonsado taageerooyinka lagama maarmaanka u ah hubinta khibrada ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah ee dugsiga dhexe ee ardaydeeda sanadka soo socda. Creston wuxuu u baddelmi doonaa iskuulka K-5 dayrta 2022, iyadoo tubtiisa quudinta la go'aamin doona inta lagu jiro Wajiga 2 ee shaqada isbahaysiga.
- **Kala-qeybinta quudi-yaha(yaasha) Atkinson:** Qaar ka mid ah xubnaha isbahaysiga waxay muujiyeen walaac ku saabsan soo bandhigida quudinta kala qaybsan ee loogu talagalay Atkinson-iyadoo lagu talinayo, barnaamijka xaafadda Atkinson wuxuu sii wadi doonaa quudinta Mt. Tabor Middle School, halka barnaamijkeeda Isbaanishka DLI uu quudin doono Kellogg (oo ay weheliso barnaamijyada kale ee Isbaanishka DLI ee Koonfur-bari). Haddii taladani ay horay u socoto, PPS waa inay la macaamisho qoysaska iyo ardayda ka diiwaangashan barnaamijka Isbaanishka DLI ee Mt. Tabor Middle School si loo hubiyo in si ku-meel-gaadh ah loogu wareego Kellogg. Inta lagu jiro Wajiga 2 ee shaqadiisa, isbahaysigu wuxuu si dhow u eegi doonaa saameynta iyo rabitaanka quudiyaasha kala qeybsan ee duruufaha kala duwan.



Isqorista & Barnaamij Isudheellitirka Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari Xirmada Talo soo-jeedinta - 12/17/2020

- **Kellogg malahan barnaamijyada 'DLI' ee Shiinaha:** Xubnaha isbahaysiga qaarkood waxay muujiyeen walaac ku saabsan in aan Kellogg laga helin barnaamijyada DLI ee Shiinaha - iyo gaar ahaan, saameynta gaadiidka haddii isbahaysigu go'aansado inuu u raro barnaamijka Shiinaha DLI ee Hosford dugsi kale mustaqbalka. Maaddaama isbahaysigu uusan sameynin talo bixin ku saabsan goobaha barnaamijka DLI ee Shiinaha ee Wejiga 1, wax tallaabo degdeg ah loogama baahna PPS. Isbahaysigu wuxuu u tixgelin doonaa aragtiyada gaadiidka wadahal kasta oo ku saabsan goobaha barnaamijka DLI ee Wajiga 2 ee shaqadiisa.

Tixgelinnada Dheeraadka ee Hirgelinta

Shaqalaha PPS waxay aqoonsadeen tixgelinno fulineed oo dhowr ah oo dheeri ah, haddii taladani ay horay u socoto.

- **Adeegyada Waxbarashada Khaaska ah:** Waaxda Waxbarashada Khaaska ah waxay tilmaamtay inuu jiri doono ugu yaraan hal fasal oo diirada lagu saari doono Waxbarashada Khaaska ah ee Kellogg MS sanadka 2021-22, marka lagu daro taageerooyinka xarunta waxbarashada. Sannadaha soo socda, waaxdu waxay u baahan doontaa saddex fasal oo diirad-saar ah ee Kellogg, si loogu helo adeeg joogto ah oo loogu talagalay ardayda gobolka. Boos u banaynta tan waxay ahayd tixgelin dheeri ah oo ku saabsan xadadka bilowga ah ee isqorista Kellogg.
- **Gaadiidka:** Ardayda u jirta in ka badan 1.5 mayl Kellogg waxay xaq u yeelan doonaan gaadiidka PPS, oo ay weheliso adeegga baska loo qoondeeyey sida looga baahan yahay ardayda Ku-barashada Isbaanishka, ardayda Qorshahooda Waxbarasho ee Shakhsiyeed iyo dhibaatooyinka nabdoonaanta ay ku jirto gaadiidka. Shaxda hoose waxay muujinaysaa qeybaha kaqeybgalka aagagga la soo jeediyey ee dugsiyada quudinta ee Kellogg ay u qalmi doono gaadiid. Dib-u-eegis buuxda oo ku saabsan arrimaha gaadiidka ee dugsiyada quudinta ee Kellogg ayaa [halkaan](#) ku yaal.

Wejiga 1 ee Quudiyaha Xaafadda	U Qalmida Gaadiidka
Arleta	Midna - Dhammaan aagga imaanshaha waxay ujirtaa 1.5 mayl Kellogg MS
Lent	Dhammaan
Marysville	Geeska koonfur-bari ee aagga imaanshaha iyo aagga bariga 82nd Ave.

- **Ardayda baddelka dugsiyada quudiya Kellogg:** PPS waxay dib-u-eegi doontaa tirada ardayda beddelka ah ee hadda dhigta fasallada 5-7 ee dugsiyada quudiya kellogg, waxayna go'aamin inay kula taliso inay dhigtaan Kellogg ama dugsiyada dhexe ee loo qoondeeyey deegaankooga.
- **Xaq u lahaanshaha sii joogida Kellogg:** PPS waxay ku talin doontaa in Gudiga u ogolaado ardayda ka bilaabo Kellogg Dayrta 2021 inay halkaa sii dhigtaan ilaa fasalka sideedaad, iyadoon loo eegin wax isbedel ah oo dheeri ah oo lagu sameeyo tubaha quudinta ama soohdinta imaatinka ee isbahaysiga hagaya uu sameeyo inta lagu jiro Wajiga 2 ee shaqadiisa.

Ahmiyadaha Wajiga 2

Hubinta in Kellogg Middle School uu furmi doono Dayrta 2021 waa guul muhiim u ah howlaha isbahaysiga, laakiin waxaa jira hawlo badan oo ah in la qabto gudaha Wajiga 2 ee guban si loo hubiyo in iskuulada guud ahaan Koonfur-bari loo diyaariyo guusha muddada dheer. Qaar ka mid ah ahmiyadaha ugu muhiimsan ee isbahaysiga wajiga 2 ayaa



Isqorista & Barnaamij Isudheellitirka Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari Xirmada Talo soo-jeedinta - 12/17/2020

kuwa hoose ah. (Qaar ka mid ah fikradaha Wajiga 1 ee isbahaysigu inta badan ka wada hadlay si wax looga qabto arrimahaas ahamiyadda leh ayaa lagu daray [lifaaqa](#).)

- **Beddelka K-5 iyo u-qoondeynta dugsiga dhexe ee quudiyaha ee Creston:** Qaabka quudinta ee Creston ayaa ah go'aan muhiim ah oo leh saameyn badan oo isbeddel ah oo loogu talagalay wax ka qabashada ciriiriga dugsiga sare iyo isku dheellitirka diiwaangelinta dugsiga dhexe.
- **Abuuritaanka qaabab quudiya oo taageeraya diiwaangelinta buuxda ee dugsiyada dhexe:** Lane iyo Harrison Park (oo u beddelmaya dugsiga dhexe sannadka 2022-23) labadooduba waxay u baahan doonaan kor u qaadis xagga diiwaangelinta ah iyada oo loo marayo isbeddelada qaabka quudinta, isbeddelada soohdinta, meelaynta barnaamijka DLI, ama isku darka saddexdaba.
- **Wax ka qabashada ciriiriga badan ee Franklin High School:** Franklin waxay ubaahantahay uga gargaaridda culeyska badan sida ugu dhaqsaha badan, ilaa boqolaal arday ka yar inta ay hada dhigato. Sababtoo ah dugsiga badan oo laga yaabo inay quudiyaan Franklin ma awoodi doonaan, go'aaminta mudnaanta kuwa quudinaya Franklin waxay noqon doontaa ahamiyadda koowaad ee hore ee Wajiga 2. Si loo dhiso xalal, isbahaysigu wuxuu ubaahanyahay bartilmaameedka ugu badan ee diiwaangelinta ee PPS, wuxuuna ubaahanyahay inuu si xeeladeysan uga fikiro adeegsiga awooda la heli karo ee kutlada Madison (Madison cluster) iyadoo loo marayo isbeddelada qaabka quudinta, isbeddelada soohdinta, ama isku-darkooda.
- **Bixinta iskuul xaafadeed oo loogu talagalay ardayda Harrison Park K-5:** Marka Harrison Park K-8 loo beddelo dugsiga dhexe, ardaydeeda K-5 waxay u baahan doonaan dib-u-dejin. Ikhtiyaarka u dhow waa dhismaha Clark, oo uu hadda ku yaal barnaamijka diiradda saara Sayniska Hal-abuurka leh (Creative Science) K-8. Si loo tixgeliyo doorashadan, isbahaysigu wuxuu u baahan doonaa hagitaan cad oo ka yimaada PPS oo ku saabsan meelaha kale ee suuragalka ah ee Sayniska Hal-abuurka leh (ama hagitaan cad oo ah in Sayniska Hal-abuurka leh uusan u guuri karin waqtigan). Haddii kale, isbahaysigu wuxuu u qaybin karaa ardayda Harrison Park K-5 dugsiyada kale ee dhow ee hoose iyada oo loo marayo isbeddelada soohdinta.
- **Iyadoo la tixgelinayo meelaynta DLI si loo xoojiyo barnaamijyada, loogu adeego dadka dhaladka ah si cadaalad ah, iyo in la kaabo barnaamijyada xaafada:** Taladan Wajiga 1 waxay kahadashay meelaynta dugsiga dhexe ee Isbaanishka DLI, laakiin isbahaysigu wuxuu ubaahanyahay inuu tixgeliyo goobta iyo qaabeynta barnaamijyada Isbaanishka DLI ee K-5 iyo heerka dugsiga sare; iyo barnaamijyada Shiinaha, Jabbaan iyo Ruushka dhammaan heerarka fasalada. PPS waxay ubaahantahay inay bixiso hagitaan cad oo ku saabsan qaabeynta barnaamijyada la doorbidayo marka laga eego dhanka waxbarida iyo howlgalka-gaar ahaan heerka K-5 - si isbahaysiga u dhameystiro shaqadan.
- **Wax ka qabashada isqorista hoose ee dugsiyada laga beddelay K-8 loona beddelay K-5:** Isqorista hoose ee Arleta, Marysville, iyo Lent waxaa lagu xallin karaa isbadalada soohdinta, meelaynta barnaamijka DLI, meelaynta fasalka pre-K, ama isku-darka waxyaabaha kore. Isbahaysigu wuxuu u baahan doonaa hagid cad oo ka timaadda PPS oo ku saabsan qorista bartilmaameedka ah ee dugsiyadan muddada gaaban/dhexdhexaadka ah.